

JAMHUURIYADDA  SOMAALILAND

GUDDIGA CADAALADDA.

MS/GGC/G-3/ /2018.

15/10/2018.

UJEEDDO: Go'aan ku saabsan Ansixin Xeer Nidaamiyaha  
Anshaxa iyo anshax marinta Garsoorayaasha  
iyo Ku Xigeenada Xeer Ilaaliyaha Guud JSL.

Guddiga Cadaaladdu:

Wuxuu fadhigiisii 1aad ee qabsoomay maanta oo bishu tahay 15/10/2018 si  
waafaqsan Qod. 107 (3) iyo Qod. 108 ee dastuurka JSL.

Ka dib markii uu Qodobada Ajendaha si qoto dheer uga dooday, sida uu qeexayo  
qoraalkiisa ( Minutes Book).

MARKAY ARKEEN: Qod. 107 (3) 108 ee Dastuurka JSL.

MARKAY ARKEEN: Danta Guud ee Cadaaladda.

MARKAY: Dood Dheer iyo falan qayn ku sameeyeen  
Xeer Nidaamiyaha Anshaxa iyo Anshax marinta  
Garsoorayaasha iyo Ku Xigeenada Xeer Ilaaliyaha  
Guud JSL, oo ka dhashay kulan hawleedkii ay  
Yeesheen bahada Garsoorku diyaarintii Xeerkan.

SIDAAS DARTEED

WUXUU GO'AAMIYEY:

In la ansixiyay Xeer Nidaamiyaha Anshaxa iyo Anshax marinta Garsoorayaasha  
iyo Ku Xigeenada Xeer Ilaaliyaha Guud ee JSL.

Allaa Mahad Leh.

Aadam X. Cali Axmed

GUDDOOMIYAHA GUDDIGA CADAALADDA.



XEER ANSHAXEEDKA GARSOORKA

---

**HORDHAC ..... 11**

**QODOBO GUUD ..... 12**

Qodobka 1: Qeexidda Xeerka Anshaxeedka ----- 12

Qodobka 2: Xadka iyo dhaqangalka Xeer Anshaxeedka --- 13

Qodobka 3: Wax-ka-bedelka ama sixitaanka Xeer  
Anshaxeedka ----- 14

Gudida Caddaaladda ayaa awood u leh inay dib u eegis iyo  
wax-ka-bedel ku samayso Xeer Anshaxeedka. ----- 14

Qodobka 4: Sarraynta Xeer Anshaxeedka ----- 14

Qodobka 5: Dhaarta ----- 14

Qodobka 6: Fasiraadda ----- 15

Qodobka 7: Daabacaada Xeer Anshaxeedka ----- 15

**QAYBTA 2AAD ..... 16**

MABAADI GUUD ----- 16

Qodobka 8: Raacitaanka Dastuurka iyo Xeerarka  
Somaliland----- 16

Qodobka 9: Madax-banaanida iyo hufnaanta ----- 16

Qodobka 10: Kobicinta kalsoonida dadwaynuhu ku qabo  
garsoorka ----- 16

Qodobka 11: Ka feejignaanta ku tacadiga karaamada iyo  
awoodda garsoorka----- 17

Qodobka 12: Mudnaan siinta waajibaadka garsoorka ----- 17

XEER ANSHAXEEDKA GARSOORKA

---

Qodobka 13: Dhex-dhexaadnimada iyo caddaaladda -----	17
Qodobka 14: Nacaybka iyo kadeedka -----	18
Qodobka 15: Saamaynta debedeed ee garsoorka lagu yeesho -----	18
Qodobka 16: Karti iyo wada shaqayn -----	19
Qodobka 17: Xaqiijinta Xaqa in dhinacyada la dhegaysto -	19
Qodobka 18: Masuuliyadda go'aan gaadhista-----	20
Qodobka 19: Dhaqanka, akhlaaqda iyo xidhiidhka -----	20
Qodobka 20: Xidhiidhada debedda (External Communications)-----	20
Qodobka 21: Hadalada garsoorka ee ku saabsan dacwad aan weli go'aa laga gaadin oo socota-----	22
Qodobka 22: Waajibaadka korjoogtaynta -----	23
Qodobka 23: Shaqo curyaamin iyo hawl gudasho la'aan --	23
Qodobka 24: Ka fal-celinta anshax xumada garsoorka -----	24
Qodobka 25: La shaqaynta Gudida Caddaaladda -----	25
<b>QAYBTA 3AAD .....</b>	<b>26</b>
QODOBO KALA DUWAN-----	26
Qodob guud -----	26
Qodobka 26: Hawlaha ka baxsan garsoorka-----	26
Qodobka 27: ka marag furid akhlaaqda qof -----	27
Qodobka 28 Isticmaalidda xog aan la shaacin -----	27

XEER ANSHAXEEDKA GARSOORKA

---

Qodobka 29: Xidhiidh la yeelashada ururo wax takooro ---	27
Qodobka 30: ka qayb-galka ururo iyo hawlo wax-barasho, deeq-bixin, wax-istar ama madani -----	28
Qodobka 31: Jagooyinka leh masuuliyado maaliyadeed ---	29
Qodobka 32: Xeer-beegti (Arbitrator) ama dhex-dhexaadiye (Mediator) -----	30
Qodobka 33: Ku shaqaysig xirfadda sharciga-----	30
Qodobka 34: hawlaha ka baxsan garsoorka -----	30
Qodobka 35: qaadashada iyo ka warbixinta hadiyadaha, daynta, faa'iidooyinka iyo ashyaada kale ee qiimaha leh --	31
<b>QAYBTA 4AAD .....</b>	<b>31</b>
<b>GUDIDA KORMEERKA IYO BAADHITAANKA -----</b>	<b>31</b>
Qodobka 36: Dooraka iyo xilka Gudida Kormeerka iyo Baadhitaanka-----	31
Anshax Ciqaabeedka ka Dhanka Garsoorayaasha iyo Ku-igeenada Xeer Ilaaliyaha Guud-----	33
Anshax ciqaabeedka ka dhanka garsoorayaasha -----	33
Ujeedooyinka iyo Fulinta Anshax Ciqaabeedka -----	33
Noocyada Anshax Marinta-----	34
Qaybaha Anshax Marineed ee Garsooraha -----	35
B. Anshax xumada fudud ee Garsooraha -----	35
T. Anshax Xumada Culus ee Garsooraha-----	37

XEER ANSHAXEEDKA GARSOORKA

---

Tusaalayaasha hoos ku xusani waa anshax xumada culus ee garsooraha: -----	37
Tallaabooyinka laga qaadayo Anshax Xumoda Fudud: ----	39
Marxaladda koowaad -----	40
Anshax Ciqaabedka Gaarka ah-----	40
Maamul Xumada Garsoorayaasha -----	40
Anshax Ciqaabedka Maamul -----	41
Anshax ciqaabedka ka dhanka ah xeer ilaaliye ku xigeenada -----	42
Ujeedooyinka iyo fulinta Anshax Ciqaabedka-----	42
Noocyada Anshax Ciqaabedka-----	42
Noocyada Anshax Marinta Ka Dhanka ah Xeer -ilaalinta -	43
B. Anshax Xumada Fudud ee Ku-Xigeenka Xeer Ilaaliyaha Guud-----	43
T. Anshax Marinta Culus ee Ku-xigeenada Xeer-ilaaliyaha Guud-----	44
Tusaalayaasha hoos ku xusan ayaa ah anshax xumada culus: -----	44
Anshax Ciqaabedka ka Dhanka Ku-igeenka Xeer Ilaaliyaha Guud-----	47
B. Tallaabooyinka laga qaadayo anshax xumada fudud ----	47
Marxaladda koowaad: -----	47
Marxaladda labaad -----	47

XEER ANSHAXEEDKA GARSOORKA

---

Marxaladda sedexaad: -----	47
Intaa wixii ka danbeeya:-----	47
T. Tallaabooyinka laga qaadayo anshax xumada culus -----	47
Anshax Ciqaabedka Gaarka ah-----	49
Maamul Xumada Ku-xigeenka Xeer Ilaaliyaha Guud -----	49
Anshax Ciqaabedka Maamul -----	50
<b>English Version.....</b>	<b>51</b>
<b>PREAMBLE .....</b>	<b>52</b>
<b>PART 1 .....</b>	<b>53</b>
GENERAL PROVISIONS-----	53
Article 1: Definition of the Code of Conduct -----	53
Article 2: Scope and Implementation of the Code of Conduct -----	54
Article 3: Amendments to or Corrections of the Code of Conduct -----	54
Article 4: Basis of Supremacy of the Code of Conduct-----	54
Article 5: Oath -----	54
Article 6: Interpretation-----	55
Article 7: Publishing the Code of Conduct -----	55
<b>PART 2 .....</b>	<b>56</b>
GENERAL PRINCIPLES -----	56

XEER ANSHAXEEDKA GARSOORKA

---

Article 8: Compliance with the Constitution and Law of Somaliland-----	56
Article 9: Independence and Integrity -----	56
Article 10: Promoting Public Confidence in the Judiciary	56
Article 11: Avoiding Abuse of the Prestige and Power of the Judiciary -----	56
Article 12: Giving Precedence to the Duties of the Judiciary -----	57
Article 13: Impartiality and Fairness -----	57
Article 14: Prejudice and Harassment -----	57
Article 15: External Influences on the Judiciary -----	57
Article 16: Competence and Cooperation-----	58
Article 17: Ensuring the Right to Be Heard -----	58
Article 18: Responsibility to Decide -----	58
Article 19: Behaviour, Attitude, and Communication -----	58
Article 20: External Communications -----	59
Article 21: Judicial Statements on Unresolved and Current Cases -----	60
Article 22: Supervisory Duties -----	61
Article 23: Impairment and Disability-----	61
Article 24: Responding to Judicial Misconduct-----	62

XEER ANSHAXEEDKA GARSOORKA

---

Article 25: Cooperation with the High Judicial Commission	62
-----	-----
<b>PART 3 .....</b>	<b>63</b>
MISCELLANEOUS PROVISIONS	63
-----	-----
General Provisions	63
-----	-----
Article 26: Extrajudicial Activities in General	63
-----	-----
Article 27: Testifying as a Character Witness	64
-----	-----
Article 28 Use of Non public Information	64
-----	-----
Article 29: Connection with Discriminatory Organisations	64
-----	-----
Article 30: Participation in Educational, Charitable, Fraternal, or Civic Organisations and Activities	64
-----	-----
Article 31: Positions with Financial Responsibilities	65
-----	-----
Article 32: Service as Arbitrator or Mediator	66
-----	-----
Article 33: Practice of Law	66
-----	-----
Article 34: Compensation for Extrajudicial Activities	67
-----	-----
Article 35: Acceptance and Reporting of Gifts, Loans, Benefits or Other Things of Value	67
-----	-----
<b>PART 4 .....</b>	<b>67</b>
MONITORING AND INSPECTION COMMITTEE	67
-----	-----
Article 36: Roles and Functions of the Monitoring and Inspection Committee	67
-----	-----
<b>Disciplinary Sanctions for</b>	<b>69</b>



## **the Judiciary 69**

DISCIPLINARY SANCTIONS AGAINST	70
JUDGES	70
Objectives and Implementation of Disciplinary Sanctions:	70
Range of Disciplinary Sanctions	70
THE CATEGORIES OF DISCIPLINARY MISCONDUCT BY A JUDGE ARE:	72
SIMPLE MISCONDUCT BY A JUDGE	72
GRAVE MISCONDUCT BY A JUDGE	74
B. The Following are Examples of Grave Misconduct:	74
In Further Instances:	76
B. Sanctions for Grave Disciplinary Misconduct:	76
SPECIAL DISCIPLINARY SANCTIONS	77
MALADMINISTRATION BY JUDGES	78
ADMINISTRATIVE DISCIPLINARY SANCTIONS	78
DISCIPLINARY SANCTIONS AGAINST	80
DEPUTY ATTORNEY GENERALS	80
Objectives and Implementation of Disciplinary Sanctions:	80
Range of Disciplinary Sanctions	80
THE CATEGORIES OF DISCIPLINARY MISCONDUCT BY THE PROCURACY ARE:	82

XEER ANSHAXEEDKA GARSOORKA

---

SIMPLE MISCONDUCT BY A DEPUTY ATTORNEY	
GENERAL: -----	82
A. The following are examples of <i>Simple</i> Misconduct: ---	82
GRAVE MISCONDUCT BY A DEPUTY ATTORNEY	
GENERAL: -----	83
B. The following are examples of <i>Grave</i> Misconduct: ----	83
A. Sanctions for <i>Simple</i> Disciplinary Misconduct: -----	85
B. Sanctions for <i>Grave</i> Disciplinary Misconduct: -----	85
In the First Instance: -----	85
In the Second Instance: -----	85
In the Third Instance: -----	85
SPECIAL DISCIPLINARY SANCTIONS -----	86
MALADMINISTRATION BY A DEPUTY ATTORNEY	
GENERAL -----	86
ADMINISTRATIVE DISCIPLINARY SANCTIONS -----	87

## XEER ANSHAXEEDKA GARSOORKA

---

### **HORDHAC**

Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland wuxuu abuuray garsoor madax-banaan oo ah waax u xilsaaran ilaalinta xuquuqaha iyo xoriyaadka aasaasiga ah ee muwaadiniinta Somaliland iyo bixinta adeeg garsoor oo dhex-dhexaad ah.

In la sameeyo hanaan iyo habraacyo maamul waxaay keenaysaa in la xoojiyo garsoorka lana xaqiijiyo kalsoonida dadwaynuhu ku qabo garsoorka iyo in:

- Garsoorayaasha iyo xeer-ilaaliyayaashu ay noqdaan kuwo u madax-banaan gudashada waajibaadkooda garsoor:
- Garsoorayaasha iyo xeer-ilaaliyayaashu lagula xisaabtamo falalka ay sameeyaan inta ay ku hawlan yihiin gudashada waajibaadkooda garsoor.

Marka la eego muhiimdda ay leedahay in la helo hanaan anshaxmarineed oo uu yeesho garsoorku sida ku cad Xeerka Nidaamka Garsoorka (Xeer Lr. 24/2003), Gudida Caddaalada ee Jamhuuriyadda Somaliland waxa loo aasaasay inuu fuliyo waajibaadka dastuuriga ee saaran si waafaqsan qodobka 106 ee Dastuurka Somaliland.

Waxa daruuri ah in Gudida Caddaaladu yeesho hanaan iyo habraacyo uu kula xisaabtami karo garsoorka, kuna hubin karo madax-banaanida, isla-xisaabtanka iyo daah-furnaanta garsoorka.

Gudida Caddaaladu iyada oo fulinaysa awoodeeda sharci si waafaqsan qodobka 108 ee Dastuurka iyo qodobka 32 ee Xeerka

## XEER ANSHAXEEDKA GARSOORKA

---

Nidaamka Garsoorka (Xeer Lr. 24/2003) waxaay ansixisay Xeer Anshaxeedka Garsoorka Jamhuuriyadda Somaliland, si uu u bedelo Xeer Anshaxeedkii hore ee la sameeyey 2011.

### QAYBT 1AAD

## QODOBO GUUD

Garsoorayaasha iyo ku-xigeenada xeer-ilaaliyaha guud waa inay ilaaliyaan oo kobciyaan madax-banaanida iyo dhex-dhexaadnimada garsoorka, islamarkaana waa inay ka fogaadaan dhamaan dhaqamada aan haboonayn ama dhaqamada u muuqda kuwo aan haboonayn.

### Qodobka 1: Qeexidda Xeerka Anshaxeedka

#### 1. Xeer anshaxeed:

- B) Xeer Anshaxeedka waxa looga gol leeyahay in lagu abuurro halbeegyada hab-dhaqanka anshaxa ku sallaysan ee saraakiisha garsoorka, iyo in loogu dhaqmo si waafaqsan dastuurka, xeerarka dalka, xukunada maxkamadda iyo masuuliyadaha sharci iyo dhamaan duruufaha la xidhiidha oo dhan.
- T) Xeer Anshaxeedkan waa in loo tafsiirtaa si aan waxyeelo u gaysanayn madax-banaanida aasaasiga ah ee saraakiisha garsoorka marka ay gaadhayaan go'aano garsoor ama si xadidaysa xuquuqohooda sharci.
- J) Xeer Anshaxeedkan waxa loogu yeedhayaa “Xeer Anshaxeedka Garsoorka Jamhuuriyada Somaliland.”

XEER ANSHAXEEDKA GARSOORKA

---

**X) Garsoor:** Xeer Anshaxeedkan gudahiisa garsoor waxa looga jeedaa garsoorayaasha maxkamadaha rafcaanka, maxkamadaha gobolada iyo maxkamadaha degmooyinka, iyo sidoo kale ku-xigeenada Xeer-ilaaliyaha Guud ee Jamhuuriyadda Somaliland.

**KH) Gudida Kormeerka iyo Baadhitaanka:** waxa looga jeedaa xubno ay u magacwday Gudida Caddaaladdu ee Jamhuuriyadda Somaliland inay gutaan xilka ah kormeerista (monitor) iyo baadhista (inspect) dacwadaha iyo hawl gudashada (operations) garsoorka, iyo inay baadhitaan ku sameeyaan cabashooyinka ka dhanka ah falalka garsoorayaasha iyo ku-xigeenada Xeer-ilaaliyaha Guud.

**Qodobka 2: Xadka iyo dhaqangalka Xeer Anshaxeedka**

1. Xeer Anshaxeedkan waxa lagu dabaqayaa garsoorayaasha maxkamadaha hoose iyo ku-xigeenada xeer-ilaaliyaha guud ee Jamhuuriyadda Somaliland.
2. Xeer Anshaxeedkani wuxuu dhaqangelayaa 30 maalmood gudohood laga bilaabo taariikhda ay Gudida Caddaaladdu ansixiso.

XEER ANSHAXEEDKA GARSOORKA

---

### **Qodobka 3: Wax-ka-bedelka ama sixitaanka Xeer Anshaxeedka**

Gudida Caddaaladda ayaa awood u leh inay dib u eegis iyo wax-ka-bedel ku samayso Xeer Anshaxeedka.

### **Qodobka 4: Sarraynta Xeer Anshaxeedka**

1. Waa waxba kama jiraan (null and void) siyaasadaha iyo hababka ay soo saarto Gudida Caddaaladu ee ka horimanaya Xeer Anshaxeedkan

### **Qodobka 5: Dhaarta**

1. Sida ku cad qodobka 19aad ee Xeerka Nidaamka Garsoorka (Xeer Lr. 24/2003), garsoorayaasha maxkamadaha hoose iyo ku-xigeenada Xeer-ilaaliyaha Guud waa inuu dhaariyaa Gudoomiyaha Maxkamadda Sare.
2. *WAXAAN ILAAHAY UGU DHAARTAY INAAN DAACAD U NOQONAYO DIINTA ISLAAMKA, DASTUURKA SOMALILAND IYO SHURUUCDA KALE EE DALKA JAMHUURIYADDA SOMALILAND, IYO INAAN U GUDANAYO WAAJIBAADKAYGA SI DAACADNIMO IYO DHEX-DHEXAADNIMO AH.*

XEER ANSHAXEEDKA GARSOORKA

---

**Qodobka 6: Fasiraadda**

1. Xeer Anshaxeedkan waa in loo fasiraa si waafaqsan Dastuurka Somaliland, Shareecada Islaamka iyo mabaadida caalamiga ah ee garsoorka.
2. Dastuurka Somaliland iyo Xeerka Nidaamka Garsoorka ayaa ka sareeya Xeer Anshaxeedkan, waana in loo raaco si iyaga waafaqsan marka la fadirayo.
3. Gudida Caddaalada ayaa awood u leh inay fadirto Xeer Anshaxeedkan.

**Qodobka 7: Daabacaada Xeer Anshaxeedka**

1. Gudida Caddaaladu waxaay masuul ka tahay daabicista Xeer Anshaxeedka iyo inay barto garsoorayaasha maxkamadaha hoose iyo ku-xigeenada Xeer-ilaaliyaha Guud Xeer Anshaxeedka.

**XEER ANSHAXEEDKA GARSOORKA**

---

## **QAYBTA 2AAD**

### **MABAADI GUUD**

#### **Qodobka 8: Raacitaanka Dastuurka iyo Xeerarka Somaliland**

1. Garsoorayaasha maxkamadaha hoose iyo ku-xigeenada Xeer-ilaaliyaha Guud waa inay mar walbaa raacaan xeerarka Somaliland iyo Xeer Anshaxeedka ay soo saartay Gudida Caddaaladdu.

#### **Qodobka 9: Madax-banaanida iyo hufnaanta**

1. Kakanaanta, xaasaasiyadda iyo muhiimadda ay leeyihiin dhamaan dacwadaha ay qaadaan maxkamaduhu darteed, iyo muhiimadda ay leeyihiin madax-banaanida iyo hufnaantu, waa inay garsoorayaasha iyo ku-xigeenada Xeer-ilaaliyaha Guud xor ka noqdaan, loona arkaa inay xor ka yihiin saamayn cid kale ku yeelato maadaama oo dhamaan dadku siman yihiin sharciga hortisa.

#### **Qodobka 10: Kobcinta kalsoonida dadwaynuhu ku qabo garsoorka**

1. Garsoorayaasha iyo ku-xigeenada Xeer-ilaaliyaha Guud waa inay mar walba u dhaqmaan qaab kobcinaysa kalsoonida ay dadwaynuhu ku qabaan madax-banaanida, daah-furnaanta, daacadnimada iyo dhex-dhexaadnimada



XEER ANSHAXEEDKA GARSOORKA

---

garsoorka, waana inay ka feejignaadaa dhamaan dhaqamada aan haboonayn.

**Qodobka 11: Ka feejignaanta ku tacadiga karaamada iyo awoodda garsoorka**

1. Garsoorayaasha iyo ku-xigeenada Xeer-ilaaliyaha Guud waa inaanay si xun u isticmaalin oo ku tacadiyin karaamada iyo awoodda garsoorka iyaga oo uga dan leh inay ku horumariyaan danhooda shaqsi ama dhaqaale, ama inay u ogolaadan inay cid kale si xun u isticmaasho ama ku tacadido.

**Qodobka 12: Mudnaan siinta waajibaadka garsoorka**

1. Waajibaadka garsooraha ama ku-xigeenka Xeer-ilaaliyaha Guud, sida uu sharcigu dhigayo, ayaa ka leh mudnaanta dhamaan hawlaha shaqsi iyo kuwa ka baxsan garsoorka.

**Qodobka 13: Dhex-dhexaadnimada iyo caddaaladda**

1. Garsoorayaasha iyo ku-xigeenada Xeer-ilaaliyaha Guud waa inay ilaaliyaan oo dabaqaan sharciga, waana inay u gutaan dhamaan waajibaadkooda si caddaalad ah oo dhex-dhexaadnimo ah.

XEER ANSHAXEEDKA GARSOORKA

---

**Qodobka 14: Nacaybka iyo kadeedka**

1. Garsoorayaasha iyo ku-xigeenada Xeer-ilaaliyaha Guud waa inay u gutaan waajibaadkooda oo ay ka mid tahay waajibaadka maamul si aanay ku jirin nacayb (prejudice).
2. Garsoorayaasha iyo ku-xigeenada Xeer-ilaaliyaha Guud intay gudanayaan waajibaadkooda waa inaanay hadal ama ficil ahaan toona ku muujin nacayb ama aanay samayn fal cid ay ku kadeedayaan (harassment), waana inaanay u ogolaan inay sidaas sameeyaan shaqaalaha maxkamadda, saraakiisha maxkamadda ama dadka kale ee hoos yimaadda awaamiirta iyo maamulka garsooraha ama ku-xigeenka Xeer-ilalaiye.
3. Garsooruhu waa inuu ku waajibiyaa ku-xigeenada Xeer-ilaaliyaha Guud iyo qareenada ku jira dacwadda uu hayo ee hortaal maxkamadda inay ka fogaadaan inay muujistaan nacayb (prejudice) ama inay sameeyaan wax kadeed ku ah dhinacyada, maragga ama qareenada.

**Qodobka 15: Saamaynta debedeed ee garsoorka lagu yeesho**

1. Garsoorayaasha iyo ku-xigeenada Xeer-ilaaliyaha Guud waa inaanay duwin oo saamayn ku yeelaan aragtida dadwaynaha (public opinion) ama cabsi ay ka qabaan dhaliisha.
2. Garsoorayaasha iyo ku-xigeenada Xeer-ilaaliyaha Guud waa inaanay ogolaan in dano ama xidhiidh qoys, bulsho, siyaasadeed, maaliyadeed ama dano iyo xidhiidh kale ay saamayn ku yeeshaan hawlohooda ama xukunada ay gaadhayaan.

XEER ANSHAXEEDKA GARSOORKA

---

3. Garsoorayaasha iyo ku-xigeenada Xeer-ilaaliyaha Guud waa inaanay gudbin ama ogolaan in cid kale gudbiso dareen ah in qof ama urur uu awood u leeyahay inuu saamayn ku yeesho garsoore ama ku-xigeen Xeer-ilaaliye Guud.

**Qodobka 16: Karti iyo wada shaqayn**

1. Garsooraha ama ku-xigeenka Xeer-ilaaliyaha Guud waa inay waajibaadkooda garsoor iyo maamul u gutaan si karti leh oo waafaqsan Xeer Anshaxeedan.
2. Garsoorayaasha iyo ku-xigeenada Xeer-ilaaliyaha Guud waa inuu wada shaqayn kala yeesho garsoorayaasha iyo ku-xigeenada Xeer-ilaaliyaha Guud ee kale iyo saraakiisha maxkamadda marka la fulinayo hawlaha maamul ee maxkamadda.

**Qodobka 17: Xaqiijinta Xaqa in dhinacyada la dhegaysto**

1. Garsooruhu waa inuu xaqiijiyaa in qof kasta oo dan sharci ku leh dacwada ma qareenka qofka la siiyo xaqa in la dhegaysto si waafaqsan sharciga.
2. Garsooruhu wuu ku dhiirigelin karaa dhinacyada dacwada iyo qareenadooda inay uga heshiiyaan waxay isku khilaafsan yihiin si sharciga waafaqsan, balse waa inaanu u dhaqmin qaab ku qasbaya ama ku riixaya dhinac inuu heshiis aqbalo.

XEER ANSHAXEEDKA GARSOORKA

---

**Qodobka 18: Masuuliyadda go'aan gaadhista**

1. Garsooruhu waa inuu dhegaysto oo ka go'aan gaadho arinka horyaal ee loo dhiibay, marka laga reebo xaaladaha durista ee sharciga ama Xeer Anshaxeedku dhigay.

**Qodobka 19: Dhaqanka, akhlaaqda iyo xidhiidhka**

1. Garsooruhu waa inuu u maamulo dacwadaha uu qaadayo hab wanaagsan oo ku dhisan akhlaaq fiican.
2. Garsoorayaasha iyo ku-xigeenada Xeer-ilaaliyaha Guud waa inay noqdaan kuwo dulqaad iyo karaamo leh islamarkaana si sharaf leh ula dhaqma dadka dacwadda dhinac ka ah, maragyada, qareenada, shaqaalaha maxkamada iyo dadka kale ee garsooraha ay ku kulmaan hawlihiisa garsooranimu, waana inuu ka fisho hab dhaqan sidaas la mid ah qareenada, shaqaalaha maxkamadda, iyo cidii kale ee hoos timaadda awaamiirta iyo maamulka garsooraha ama ku-xigeenka Xeer-ilaaliyaha Guud.

**Qodobka 20: Xidhiidhada debedda (External Communications)**

1. Garsooruhu waa inaanu samayn, ogolaan ama isku dayin inuu la sameeyo xidhiidh cid kale iyada oo aanay joogin dhinacyada dacwadda ama qareenadooda, marka arimuhu yihiin kuwo khuseeya dacwad socota, marka laga reebo xaaladahan soo socda:
  - A. Hadii ay jiraan duruufu keenay in garsooruhu la sameeyo xidhiidh cid kale iyada oo ujeedadu tahay

XEER ANSHAXEEDKA GARSOORKA

---

inuu dacwad mudeeyo, ama ujeeedo maamul ama mid degdeg ah (emergency) darteed oo aan xidhiidh la lahayn nuxurka sharci ama dhacdo (legal or factual) ee dacwadda socota, waa la ogol yahay inuu xidhiidhkaas sameeyo, waxaa se shardi ah:

1. In garsooruhu uu sabab caqligal ah darteed ku aaminay inaan dhinacna ka helayn xidhiidhkaas faa'iido habraac (procedural), nuxur (substantive) ama farsamo (tactical); iyo
2. In garsooruhu uu si dhaqso ah ugu ogaysiiyo xidhiidhka uu sameeyo dhinacyada kale ee uu khuseeyo arinku, islamarkaana uu siiyo dhinacyada fursad ay ku jawaabaan si waafaqsan xeerka.
2. Garsooruhu wuu ka heli karaa khabiir sharci oo aan dan ku lahayn dacwadda talo-sharci oo la xidhiidha sharciga lagu dabaqayo dacwadda hortaal garsooraha, hadii garsooruhu marka hore sii ogaysiiyo dhinacyada qofka uu la tashanayo iyo waxa uu kala tashanayo, islamarkaana uu siiyo dhinacyada fursad caqligal ah oo ay isku hortaagi karaan oo ay kaga jawaabi karaan ogaysiiska iyo talada garsooaha la siiyay.
3. Hadii garsooruhu uu si aan ku talo gal ahayn u helo xidhiidh cid kale la samaysay oo khuseeya nuxurka dacwadda, garsooruhu waa inuu sida ugu dhaqsaha badan u ogaysiiyaa dhinacyada waxa uu ku saabsanaa xidhiidhkaasi, waana inuu siiyaa dhinacyada fursad ay kaga jawaabaan si waafaqsan sharciga.
4. Garsooraha uma banaana inuu si iskii ah ugu sameeyo baadhitaan dhacdooyinka (facts), waana inuu tixgeliyaa

XEER ANSHAXEEDKA GARSOORKA

---

keliya cadaymaha maxkamadda loo soo gudbiyay, haseyeeshee wuxuu codsan karaa in cadaymo dheeraad ah loo soo gudbiyo.

5. Gudoomiyaha maxkamadda iyo madaxa xafiiska xeer-ilaalinta ee gobolku waa inay sameeyaan dadaal caqligal ah oo ay ka mid tahay korjoogtaynta haboon, si ay u xaqiijiyaan in qodobkan aanay ku xadgudbin shaqaalaha maxkamadda, saraakiisha maxkamada iyo dadka kale ee hoos yimaadda awaamiirtooda iyo maamulkooda.

**Qodobka 21: Hadalada garsoorka ee ku saabsan dacwad aan weli go'aa laga gaadin oo socota**

1. Garsoorayaasha iyo ku-xigeenada Xeer-ilaaliyaha Guud looma ogola inay si furan u yidhaahdaan hadal (public statement) kaas oo ay suurtagal tahay inuu saamayn ku yeesho natiijada ama uu waxyeelo u gaysto cadaaladnimada dacwad aan go'aan laga gaadhin ama ka socota maxkamad, ama inay u yidhaahdaan si aan furnayn (non-public) hadal ay suurtagal tahay inuu faro-geliyo dacwad qaadis ama dhegayis xaq ah (fair trial or hearing).
2. Garsoorayaasha iyo ku-xigeenada Xeer-ilaaliyaha Guud waa inaanay samayn balan qaadyo lid ku ah inay si dhex-dhexaadnimo ah u gutaan waajibaadkooda ama xilka xirfadeed ee saaran.
3. Gudoomiyaha maxkamadda iyo madax xafiiska xeer-ilaalinta ee gobolku waa inuu ku waajibiyaa shaqaalaha maxkamadda, saraakiisha maxkamadda iyo dadka kale ee hoos yimaadda awaamiirtiisa iyo maamulkiisa inay ka fogaadaan inay ku hadlaan hadalada lagu mammnuucay farqadaha (1) iyo (2) ee qodobkan.

XEER ANSHAXEEDKA GARSOORKA

---

4. Marka laga reebo xanibaadaha ku xusan farqadda (1) ee qodobkan, garsoore ama ku-xigeen Xeer-ilaaliye wuxuu odhan karaa hadal furan isaga oo gudanaya waajibaadkiis rasmiga ah, ama sharixi karaa habraacyada maxkamadda, ama ka hadli karaa dacwad uu garsooraha ama ku-xigeenka Xeer-ilaaliyaha Guud uu ka yahay dhinac shaqsi ahaantiisa (personal capacity), marka ay tahay daruuri keliya.

**Qodobka 22: Waajibaadka korjoogtaynta**

1. Gudoomiyaha maxkamadda ama madaxa xafiiska xeer-ilaalinta ee gobolku waa inuu ku waajibiyaa shaqaalaha maxkamadda, saraakiisha maxkamadda iyo dadka kale ee hoos yimaadda awaamiirtiisa iyo maamulkiisa inay u dhaqmaan hanaan waafaqsan waajibaadka ku dhigan Xeer Anshaxeedkan.
2. Gudoomiyaha maxkamadda ee ku leh awooda korjoogtaynta (supervisory) garsoorayasha kale waa inuu qaado talaabooyin macquul ah oo uu ku xaqiijinayo inay u gutaan si haboon garsoorayaashu masuuliyadooda garsoor oo ay ka mid tahay inay si dhaqso badan u dhameeyaan arimaha iyo dacwadaha ay hayaan.

**Qodobka 23: Shaqo curyaamin iyo hawl gudasho la'aan**

1. Garsooraha ama ku-xigeenka Xeer-ilaaliyaha Guud ee sabab macquul ah darteed ay la noqoto in garsoore kale ama ku-xigeen Xeer-ilaaliye Guud ay curyaamin shaqo u gaysatay daroogo (drugs) ama walax kale, ama xaalad maskaxeed, dareen (emotional) ama jidh ahaaneed waa

XEER ANSHAXEEDKA GARSOORKA

---

inuu ogaysiiyaa gudoomiyaha maxkamadda ay khuseeyso ama madaxa xafiiska xeer-laalinta gobolka ee ay khuseeyso.

2. Gudoomiyaha maxkamadda ama madaxa xafiiska xeer-ilaalinta ee la ogaysiiyay in hawl-gudashada garsoore ama ku-xigeen xeer-ilaaliye oo hoos yimaadda ay curyaamin shaqo u gaysatay daroogo (drugs) ama walax kale, ama xaalad maskaxeed, dareen (emotional) ama jidh ahaaneed waa inuu ogaysiiyaa Gudida Caddaaladda.

**Qodobka 24: Ka fal-celinta anshax xumada garsoorka**

1. Garsooraha ama ku-xigeenka Xeer-ilaaliyaha Guud ee ogaada in garsoore ama ku-xigeen xeer-ilaaliye inuu galay jebin Xeer Anshaxeedkan taas oo gelinaysa su'aalo muhiim ah oo la xidhiidha dacadnimada, aaminaadda, ama ku haboonaanta garsooraha ama ku-xigeenka Xeer-ilaaliyaha Guud waa inuu ogaysiiyaa gudoomiya maxkamadda ay khuseeyso ama madaxa xafiiska xeer-ilaalinta gobolka ay khuseeyso.
2. Gudoomiyaha maxkamadda ama madaxa xafiiska xeer-ilaalinta ee gobolku marka uu helo ogaysiinta in garsoore ama ku-xigeen Xeer-ilaaliye Guud oo hoos yimaadda maamulkiisa uu galay jebin Xeer Anshaxeedkan taas oo gelinaysa suaalo muhiim oo la xidhiidha dacadnimada, aaminaadda, ama ku haboonaanta garsooraha ama ku-xigeenka Xeer-ilaaliyaha Guud waa inuu ogaysiiyaa Gudida Caddaaladda.



## **Qodobka 25: La shaqaynta Gudida Caddaaladda**

1. Garsoorayaasha iyo ku-xigeenada Xeer-ilaaliyaha Guud waa inay la shaqeeyaan oo ay daacadnimo ugula shaqeeyaan Gudida Caddaaladda.
2. Garsoore ama ku-xigeen Xeer-ilaaliyaha Guud waa inaanu si toos ah iyo si dadban toona uga aargoosan qof uu ku og yahay ama ku tuhunsan yahay inuu ka gacan siiyay ama kala shaqeeyey Gudida Caddaalada baadhitaan ay ku sameeyeen garsoore ama ku-xigeen Xeer-ilaaliye Guud.

XEER ANSHAXEEDKA GARSOORKA

---

## **QAYBTA 3AAD**

### **QODOBO KALA DUWAN**

#### **Qodob guud**

Garsoorayaasha iyo ku-xigeenada Xeer-ilaaliyaha Guud waa inay u gutaan hawlohooda shaqsiyeed, kuwa debedda ka ah iyo kuwa ka baxsan garsoorka si ka hortegaysa inay gelaan khatarta ah inay ka horyimadaan waajibaadkooda xafiiseed ee garsoorenimo iyo xeer-ilaaliyenimo.

#### **Qodobka 26: Hawlaha ka baxsan garsoorka**

1. Garsoorayaasha iyo ku-xigeenada Xeer-ilaaliyaha Guud way geli karaan hawlo ka baxsan kuwa garsoorka marka laga reebo kuwa sharciga ama Xeer Anshaxeedku ay mamnuuceen. Marka ay gudanayaan hawlo ka baxsan kuwa garsoorka, garsoorayaasha iyo ku-xigeenada Xeer-ilaaliyaha Guud waa inaanay:
  - B) Ka qayb qaadan hawlo faro gelinaya inay si haboon u gutaan wajibaadka garsoorayaasha iyo ku-xigeenada Xeer-ilaaliyaha Guud;
  - T) Ka qaby qaadan hawlo keeni doona in si joogto ah loo duro garsooraha ama ku xigeenka Xeer-ilaaliye;
  - J) Ka qaby qaadan hawlo ugu muuqan kara qofka caadiga ah inay majo-xaabinayaan madax-banaanida, daacadnimada iyo dhex-dhexaadnimada garsooraha;
  - x) Samayn fal ugu muuqan kara qofka caadiga ah inay yihiin kuwo qasab ama cabsi gelin ah;

XEER ANSHAXEEDKA GARSOORKA

---

Kh) U isticmaalin goobaha, shaqaalaha, alaabada xafiiska (stationary), qalabka ama khayraadka kale ee maxkamadda waxaan ahayn hawlaha khuseeya sharciga, hanaanka sharci, ama maamulka caddaaladda, hadii aan isticmaal dheeraad ah aanu u ogolaan sharcigu.

**Qodobka 27: ka marag furid akhlaaqda qof**

1. Garsoorayasha iyo ku-xigeenada Xeer-ilaaliyaha Guud looma ogola inay ka noqdaan dacwad hortaal garsoorka ama mid idaari ah marag wax ka fura akhlaaqda qof, ama inay si kale u xaqiijiyaan akhlaaqda qof dacwadi ku socoto, marka laga reebo xaaladaha si cad loogu soo gudbiyo yeedhmo.

**Qodobka 28 Isticmaalidda xog aan la shaacin**

1. Garsoorayaasha iyo ku-xigeenada Xeer-ilaaliyaha Guud si ku talo-gal ah uma sheegi karaan xog aan la shaacin (non-public information) oo ay ku heleen awoododa xafiiseed ujeedo ka baxsan wajiaabaadka rasmiga ah ee garsooraha ama ku-xigeenka Xeer-ilaaliyaha Guud.

**Qodobka 29: Xidhiidh la yeelashada ururo wax takoor**

1. Garsooryasha iyo ku-xigeenada Xeer-ilaaliyaha Guud xubin kama noqon karaan urur ku dhaqma takoor (discrimination).
2. Garsoorayaasha iyo ku-xigeenada Xeer-ilaaliyaha ma isticmaali karaan faa'iido ama tas-hiilaad uu leeyahay urur, hadii garsooraha ama ku-xigeenka Xeer-ilaaliye ogyahay ama uu ogaan karo in ururku uu ku dhaqmo takoor.

XEER ANSHAXEEDKA GARSOORKA

---

**Qodobka 30: ka qayb-galka ururo iyo hawlo wax-barasho, deeq-bixin, wax-istar ama madani**

1. Garsoorayaasha iyo ku-xigeenada Xeer-ilaaliyaha Guud way ka qayb geli karaan hawlaha ay sameeyaan ururo la xidhiidha sharciga, hanaanka sharci (legal system), ama maaraynta caddaalada, iyo kuwa ay sameeyaan ama loo qabto ururo waxbarasho, kuwo samo-fal, bulsho ama madani oo aan ahayn kuwo faa'iido doon ah, waxaana ka mid ah, kuma koobnee, hawlahaan soo socda:
  - B) Ka caawinta ururka ama kooxda qorshayaasha la xidhiidha ururinta dhaqaale (fund-raising) iyo ka qaybgalka maaraynta iyo maalgelinta dhaqaalaha ururka ama kooxda;
  - T) Ka soo qayb-gelida ama ka hadlid, aqbalid abaal marin (award) ama aqoonsi kale oo qayb ka ah barnaamijka iyo sidoo kale inuu ogolaado in derejadiisa (title) loo isticmaalo kullaan (event) uu leeyahay ururkaas ama kooxdaasi;
  - J) Ka talo bixinta la xidhiidha dhaqaale ururin si gaar ah ama si guud loogu samaynayo barnamijyada ama hawlaha ururka ama kooxda;
2. Garsooruhu wuu ka noqon karaa sarkaal, agaasime ama la-taliye aan ahayn mid sharci (non-legal advisor) urur ama koox, hadii aanay suurtagal ahayn in ururka ama kooxdu:
  - B) Ay qayb ka noqon doonto dacwad caadiyan hor iman doonta garsooraha; ama
  - T) Ay si joogto ah qayb uga noqon karto dacwad hortimaadda maxkamadda uu ka tirsan yahay, ama maxkamad kasta oo hoos timaadda ikhtisaaska maxkamadda rafcaanka ee uu ka tirsan yahay;

### **Qodobka 31: Jagooyinka leh masuuliyado maaliyadeed**

1. Garsoorayaasha iyo ku-xigeenka Xeer-ilaaliyaha Guud ma qaban karaan jago leh masuuliyado maaliyadeed sida fuliye (executor), maamule, ilaaliye (guardian), ama inuu shaqsiyan wakiil noqdo, marka laga reebo xaaladaha khuseeya hanti uu leeyahay xubin qoyskiisa ka mid ah ama qof qoyska garsooraha ama ku-xigeenka Xeer-ilaaliyaha ka tirsan, wuxuuna tan danbe noqon karaa oo keliya hadii adeegaasi aanu faro-gelin doonin hawlgudashada haboon ee garsooraha ama ku-xigeenka Xeer-ilaaliyaha Guud.
2. Garsoore ma qaban karo jago leh masuuliyado maaliyadeed hadii ay suurtagal tahay in garsooruhu qayb ka noqon doono dacwad caadiyan hor iman lahayd garsooraha, ama hadii hantida ama qofka uu danihiisa maaliyadeed uu ilaalinayo garsooruhu uu qayb ka noqdo dacwad soo gasha maxkamadda uu ka tirsan yahay garsooruhu, ama maxkamad ka tirsan ikhtisaaska maxkamadda rafcaanka ee uu ka tirsan yahay.
3. Garsooraha ama ku-xigeenka Xeer-ilaaliyaha Guud ee sii haya (ku-sime) jago leh masuuliyado maaliyadeed oo uu u hayo qof kale waxa qabanaya isla xanibaadaha khuseeya gelitaanka hawlo maaliyadeed ee lagu dabaqayo shaqsi ahaanta garsooraha ama ku-xigeenka Xeer-ilaaliyaha Guud.
4. Qofka isaga oo haya jago leh masuuliyad maaliyadeed noqda garsoore ama ku-xigeenka Xeer-ilaaliyaha Guud waa inuu raaco oo wafaqo qodobkan sida ugu dhaqsaha badan ee macquulka ah, balse marna kama badan karto sanad laga bilaabo xiliga uu noqday garsooraha ama ku-xigeenka Xeer-ilaaliyaha Guud.

XEER ANSHAXEEDKA GARSOORKA

---

**Qodobka 32: Xeer-beegti (Arbitrator) ama dhex-dhexaadiye (Mediator)**

1. Garsooruhu ma noqon karo xeer-beegti ama dhex-dhexaadiye, mana qaban karo hawlo kale oo garsoor oo aan ahayn waajibaadka rasmiga ah ee garsooraha, marka laga reebo xaaladaha uu sharcigu sida cad u sheegay.

**Qodobka 33: Ku shaqaysig xirfadda sharciga**

1. Garsooruhu kuma shaqaysan karo xirfadda sharciga. Garsoore waa meteli kara wuuna siin karaa talo sharci islamarkaan u qori kara ama dib-u-eegis ugu samayn karaa qoraalo xubin ka tirsan qoyskiisa isaga oo aan ka qaadan wax lacag ama magdhow kale ah, balse waa ka mamnuuc inuu u noqdo xubinta qoyskiisa ka tirsan qareen.

**Qodobka 34: hawlaha ka baxsan garsoorka**

1. Garsoore wuu qaadan karaa xaquuq (compensation) uu ku helay hawlo uu qabtay oo ka baxsan arimaha garsoorka, hawlahaas oo ah kuwo uu ogol yahay Xeer Anshaxeedkan ama xeer kale, hadii qaadashada xaqaasi aanay qofka caadiga ah ugu muuqan inay majaxaabin ku tahay madax-banaanida, daacadnimada iyo dhex-dhexaadnimada garsoorka.

XEER ANSHAXEEDKA GARSOORKA

---

**Qodobka 35: qaadashada iyo ka warbixinta hadiyadaha, daynta, faa'iidooyinka iyo ashyaada kale ee qiimaha leh**

1. Garsoorayaasha iyo ku-xigeenada Xeer-ilaaliyaha Guud ma qaadan karaan hadiyad, faa'iido ama ashyaada kale oo qiime leh, hadii qaadashadooda uu mamnuucay xeer ama ay ugu muuqan karto qofka caadiga ah inay majaxaabinayso madax-banaanida, daacadnimada iyo dhex-dhexaadnimada garsooraha.

**QAYBTA 4AAD**

**GUDIDA KORMEERKA IYO BAADHITAANKA**

**Qodobka 36: Doorarka iyo xilka Gudida Kormeerka iyo Baadhitaanka**

1. In la ilaaliyo xidhiidhka ku sallaysan aaminadda iyo kalsoonida ee ka dhexeeya xubnaha garsoorka Somaliland iyo dadwaynuhu wuxuu daruuri u yahay in si waxtar leh loo bixiyo adeeg caddaaladeed, iyo ugu danbayta badqabka iyo wanaagga dadka reer Somaliland.
2. Gudida Kormeerka iyo Baadhitaanka ee Gudida Caddaaladu ayaa ah ta ka shaqaynaysa sidii loogu guulaysan lahaa ujeedadaas, waxaayna ka ciyaartaa door muhiim ah xaqiijinta in garsoorku u shaqeeyo si waxtar leh.
3. Gudida Kormeerka iyo Baadhitaanku waxaay awoodeheeda u isticmaalaysaa sidii ay kormeer iyo baadhitaan u samayn lahaayeen si loo xaqiijiyo in hawlaha garsoorku ay noqdaan kuwo lagu qanacsan yahay, in Xeerka Anshaxa la raacay iyo

XEER ANSHAXEEDKA GARSOORKA

---

in habka maamul ee garsoorku uu yahay mid daah-furan oo ku dhisan cadaymo.

4. Gudida Kormeerka iyo Baadhitaanku waxaay kormeer ku samaynaysaa hawl gudashada iyo falalka garsoorka, waxaayna samaynaysaa baadhitaan buuxa oo dhex-dhexaad ah si loo xaqiijiyo in hawlgudashada garsoorka iyo falalkood ay yihiin kuwo lagu qanacsan yahay, iyo in tabo-barada iyo baahiyaha kale la tilmaamo oo wax laga qabto.
5. Gudida Kormeerka iyo Baadhitaanku waxaay qaadaysaa baadhitaan buuxa oo dhex-dhexaad ah oo ay ku samaynayso cabashooyinka dadwaynuhu ka keeno garsoorka, sidoo kale hadii ay daruuri tahay waxaay bilaabi kartaa baadhitan hadii ay ku ogaato hanaan kale sheegashooyin falal qaldan oo lagu kacay.
6. Gudida Kormeerka iyo Baadhitaanku waxaay haynaysaa diiwaanka cabashooyinka iyo qaybaha kale ee la xidhiidha hawl gudashada garsoorka, waxaayna masuul ka tahay maaraynta iyo haynta xog-kaydshaha (data base) baadhitaanada, cabashooyinka, iyo xogaha kale ee la xidhiidha, waxaayna xaqiijinaysaa in xogta hawlgudashada garsoorku ay tahay mid sax ah, si haboon loo diiwaangeliyay oo lagu kalsoonana karo, iyo in hawlaha hay'adeed iyo hawlgudashadiisa, sida ay u dhaqmaan iyo qaababka ay u badan tahay falalkoodu si haboon loo helo, qiimeeyo oo looga warbixiyo.
7. Gudida Caddaaladdu waxaay soo saari doontaa tilmaamo ay ku faah-faahinayso dooroka, xilka iyo hababka ay hawlaha u qabanayso Gudida Kormeerka iyo Baadhitaanka.



## **Anshax Ciqaabedka ka Dhanka Garsoorayaasha iyo Ku-igeenada Xeer Ilaaliyaha Guud**

### **Anshax ciqaabedka ka dhanka garsoorayaasha**

#### **Ujeedooyinka iyo Fulinta Anshax Ciqaabedka**

Ujeedada Guud ee laga leeyahay anshax marintan ka dhanka ah garsoorayaasha waa in la saxo falalka qaldan si cashar ay wax ka bartaan ay ugu noqoto garsoorayaasha kale, haday laga maarmaan noqotona shaqada looga eryo kuwa aanay suurto gal ahayn inay hagaagaan.

Garsooraha ku guuldaraysta ama ka gaabiya gudashada waajibaadkiisa mihiyadeed, ama baal mara Xeer anshaxeedka iyo waxyaabaha uu dhigayo waxa laga qaadayaa talaabooyinka iyo ciqaabaha ee ku dhigan xeer anshaxeedka.

Anshax Ciqaabedka loo maro si waafaqsan Xeer anshaxeedka kama hor istaagayo in lagu soo oogo dacwad madaniga ama mid ciqaaba garsooraha, ama ganaaxyo maaliyadeed iyo ciqaabaha kale ee sharcigu waajibiyay.

XEER ANSHAXEEDKA GARSOORKA

---

**Noocyada Anshax Marinta**

Garsooraha lagu helo inuu galay fal anshax xumo waa in la baadhaa loogana go'aan gaadhaa si waafaqsan qodobada Xeer anshaxeedka.

Anshax marinta lagu qaadayo garsooraha lagu helo inuu sameeyay fal dhaqan xumo ah waa kuwan hoos ku xusan:

- Digniin afka ah;
- Digniin Qoraal ah;
- Ganaax mushahar oo aan bil ka badnayn;
- Ganaax mushahar oo ah sedex bilood ama laba bilood;
- Hal darajo oo hoos u dhigis ah; ama
- Shaqo ka joojin (Suspension), iyadoo lagu waajibanayo ama aan lagu waajibanayn tababar dheeraad ah inuu qaato;
- Shaqo ka eryid.

Lacag kasta oo ay Guddida Cadaaladu ka hesho ganaaxyada anshax xumada waa in lagu shubaa khasnada Dawlada.

XEER ANSHAXEEDKA GARSOORKA

---

## **Qaybaha Anshax Marineed ee Garsooraha**

Qaybaha anshax marineed ee Garsooraha laga qaadayo waa:

**B. Anshax marinta dhaqan xumada fudud;**

**T. Anshax marinta dhaqan xumada culus.**

## **B. Anshax xumada fudud ee Garsooraha**

Tusaalayaashan hoos ku xusan ayaa ka mid anshax xumaanta fudud:

1. Garsooraha isaga oon wax cudur-daar ah haysan ama iyadoo aanay jirin sabab la aqbali ku guuldaraysta ama diida inuu ka qayb-galo tababaro, aqoon is waydaarsi ama dood-cilmiyeedyo loo abaabulay si kor loogu qaado aqoonta sharci iyo xirfada garsoorka.
2. Garsooraha isaga oon wax cudur-daar ah ama asbaab la aqbali karo haysan, dib-udhiga garmaqalka dacwad, ama sameeya xog qaldan oo ku saabsan dacwad maxakamada ku jirta.
3. Garsooraha isaga oo dacwad ku jira sameeya fal aan haboonayn oo wax u dhimaya sumcada garsoorka.
4. Garsooraha oo ku guuldaraysta inuu u digo, saxo ama qaado talaabo ka dhanka ah dhinaca sameeya waxyaabo aan sharci ahayn inta lagu guddo jiro garmaqalka.
5. Garsooraha oo ku guuldaraysta inuu digniin siiyo, saxo ama qaado talaabo ka dhanka ah dhinaca yimaada dacwada isaga oon diyaar ahayn.
6. Garsooraha oo ku guuldaraysta inuu digniin siiyo, saxo ama qaado talaabo ka dhan ah dhinaca isku daya inuu di u dhigo

XEER ANSHAXEEDKA GARSOORKA

---

- in go'aan lag gaadho dacwada, ama isku daya inuu ku sababeeyo dib-udhigistaas sababo aan la aqbali karin.
7. Garsooraha oo diida inuu u dhegaysto dhinacyada dacwada si dulqaad leh isla markaana dhex-dhexaadnimo ah ama si badheedha ah ugu xad gudba sumcada iyo karaamada dhinacyada midkood.
  8. Garsooraha oo ka gaabiya inuu raaco sida ku xusan xeerarka iyo hab-raacyada garsoorka, ama u guta waajibaadkiisa hab mijaxaabinaya iskaashiga iyo wadashaqaynta xubnaha kale ee garsoorka.
  9. Garsooraha oo ka gaabiya inuu digniin siiyo, saxo ama talaabo ka qaado xubnaha kale ee garsoorka ee u dhaqma si aan haboonayn ama qaab dhaqan xumo ah inta garmaqalku socdo.
  10. Garsooraha oo ka gaabiya inuu digniin siiyo, saxo ama talaabo ka qaado xubnaha kale ee garsoorka ee u adeegsada mansabkooda dano shaqsiyadeed ama macaash, ama danaha ama macaash dad kale.
  11. Garsooraha oo layeesha xidhiidh shaqsi xubnaha kale ee garsoorka kaas oo wax yeelaynaya gudashada waajibaadkiisa dhex-dhexaadnimo isla markaana hoos u dhigaya sumacada iyo karaamada garsoorka.
  12. Garsooraha oo shaqada ka maqnaada iyadoo aanay jirin sabab ama cudur-daar macquul ah.
  13. Garsooraha oo diida inuu dhegaysto dacwad loo igmaday iyadoo aanay jirin sabab ama cudur-daar macquul ah.

XEER ANSHAXEEDKA GARSOORKA

---

14. Garsooraha oo diida inuu dhegaysto dacwad isla markaana si ula kac ah u sameeya sababo been abuur ah si aanu u dhegaysan dacwadaas loo igmaday.
15. Garsooraha oo diida inuu guto waajibaadka kale ee ay u igmadaan madaxdiisu.
16. Garsooraha oo diida inuu fadhi furan ku dhegaysto dacwad iyadoo aanay jiriin sabab macquul ah ama la aqbali karo oo uu cuskaday.
17. Garsooraha oo u qabta shaqooyin kale dano shaqsi ah oo ka hor imanaya waajibaadkiisa, masuuliyadkiisa iyo sharafta garsoorka.

### **T. Anshax Xumada Culus ee Garsooraha**

#### **Tusaalayaasha hoos ku xusani waa anshax xumada culus ee garsooraha:**

1. Garsooraha oo si badheedh ah u xagliya dacwad isaga oo ku xadgubaya dabaqaada qodobada sharci ee ku haboon ama xeerka si uu uga dheefo ama u dhibo labada dhinac midkood.
2. Garsooraha oo u xagliya dhinacada dacwadu ka dhexayso midkood sababo qabiilnimo, xigtanimo, dhalasho, sinji, Xidhiidh siyaasadeed, meeqaam bulsho ama sababo kale.
3. Garsooraha oo inta garmaqalku socdo ku hanjaba gacan ka hadal ama isku daya ama kula kaca gacan ka hadal garsoore kale, hawl-wadeenada garsoorka, ama dhinacyada dacwada midkood ama qareenkooda.

XEER ANSHAXEEDKA GARSOORKA

---

4. Garsooraha oo inta garmaqalka lagu jiro ku qayliya, ama u hanjaba ama aflagaado ugaysta garsoore kale, hawl-wadeenada garsoorka, ama labada dhinac midkood ama qaareenkooda.
5. Garsooraha oo iyadoo aanay jirin sabab macquul ah ama la aqbali karo u curyaamiya awoodihiisa uu ku gudan lahaa masuuliyadiisa garsoornimo.
6. Garsooraha oo soo saara xukun dacwada ka hor intaan xukunkaasi si sharci ah loogu dhawaaqin iyadoo ay joogaan dhinacyadii dacwadu ka dhexaysay.
7. Garsooraha oo ka garnaqa dacwad uu ogyahay inaanu sharcigu awood u siinin dhegaysigeeda.
8. Garsooraha oo ka qaata ama isku daya inuu ka qaato laaluush, hadiyad ama deeqo kale qof dhinac ka ah dacwad ama qof dan ku leh dacwada.
9. Garsooraha oo si badheedha ah ugu adeegsada masuuliyadiisa ama awoodiisa dano shaqsiyadeed ama danaha labada dhinac ee dacwada midkood, ama danaha qof kale.
10. Garsooraha oo xubin ka noqda xisbi siyaasadeed ama urur.
11. Garsooraha oo isaga oo aan awood ma aqoon u lahayn caqabad ku noqda shaqada maxakamada, iyo awooda ay ku hubinayso Go'aano cadaalada.
12. Garsooraha oo u bandhiga ama daaha-uga-roga warbaahinta xog ku saabsan dacwad maxakamada ku jirta.
13. Garsooraha oo ka gaabiya inuu la shaqeeyo ama daacad u noqdo Guddida Cadaalada.

XEER ANSHAXEEDKA GARSOORKA

---

**Tallaabooyinka laga qaadayo Anshax Xumoda Fudud:**

Garsooraha lagu helo inuu sameeyayay falal baal marsan qodobada xeer anshaxeedka iyo dhamaan waxyaabaha uu dhigayo, isla markaana ku kacay fal ah anshax xumo fudud, waxa laga qaadayaa talaabooyinka anshax marineed ee hoos ku xusan:

**Marxaladda koowaad:**

- Digniin affka ah; ama
- Digniin qoraal ah.

**Marxaladda labaad:**

- Ganaax hal bil oo mushar ah.

**Marxaladda Sedexaad:**

- Ganaax laba bilood musharkood iyo inaan laba sano la dalacsiinin.

**Wixii intaa ka sii danbeeya:**

- Ganaax mushahar oo sedex bilood ah iyo hoos u dhigis hal darajo ah ama
- Shaqo ka eryid.

XEER ANSHAXEEDKA GARSOORKA

---

## **Tallaabooyinka laga qaadayo anshax xumada culus**

Garsooraha lagu helo inuu sameeyayay falal baal marsan Qodobada xeer anshaxeedka iyo dhamaan waxyaabaha uu dhigayo, isla markaana ku kacay fal ah anshax xumo culus waxa laga qaadayaa talaabooyinka anshax marineed ee hoos ku xusan.

### **Marxaladda koowaad**

- Digniin qoraal ah; ama
- Ganaax mushahar laba bilood ah iyo inaan la dalacsiin laba sano.

### **Marxaladda labaad**

- Ganaax sedex bilood oo mushar ah iyo hoos u dhigis hal darajo.

### **Marxaladda sedexaad**

- Shaqo ka eryid.

## **Anshax Ciqaabeedka Gaarka ah**

Iyada oon waxba loo dhimayn qodobada iyo wax yaalaha uu dhigayo Xeer anshaxeedka, Guddida Cadaaladu way ka eryi karaan shaqada garsoore haday u arkaan in anshax xumadiisa ay muujinayso inaanu u qalmin ama ku haboonayn garsooranimu.

## **Maamul Xumada Garsoorayaasha**

Sababa hoos ku xusan waxa loo tixgelinayaa sababo maamul xumo oo keeni kara talaabo anshax oo laga qaado guddoomiyayaasha maxakamadaha Racfaanka, Gobolka iyo Degmada;

- Hadii uu muujiyo inuu u xagliyo garsoore iyadoo aanu haysan asbaab cad oo la aqbali karo.



## XEER ANSHAXEEDKA GARSOORKA

---

- Haddii uu ka gaabiyo ama uu u hago shaqada garsoore si uu u dhibaateeyo danaha labada dhinacba iyo adeega dadwaynaha.
- Haddii uu ka gaabiyo ka warbixinta dhaqan xumada garsoore uu ka warhayay, si waafaqsan qodobada xeer anshaxa, isla markaana uu ku guuldaraysto inuu dabagal ku sameeyo si looga qaado talaabada sharci ee ku haboon.
- Haddii uu ku guuldaraysto awaamiirta sharci ee ay siiyaan gudoomiyayaasha  
Maxkamadaha racfaanka, gobolka iyo degmadu ee darajo ahaan ka sareeya.

### **Anshax Ciqaabedka Maamul**

1. Guddida Caddaaladu waxay ka eryi kartaa garsoore maxkamadaha racfaanka, gobolka iyo degmada falalka maamul xumo darteed sida ku xusan Xeer Anshaxeedka.
2. Gudoomiyaha Maxkamada Sare waxa uu mushaharka ka hakin karaa garsooraha shaqada ka maqnaada isagoon haysan ogolaansho ama cudur-daar la aqbali karo.
3. Gudoomiyaha Maxkamada Sare waa inuu ogaysiiyaa isagoo sababaynaya Guddida Cadaalada talaabooyinka anshax marineed ee uu qaaday.
4. Gudoomiyaha Maxkamada Sare shaqo joojin kuma samayn karo garsoore muddo ka badan 30 maalmood sida uu dhigayo anshax ciqaabeekani
5. Guddida cadaaladu waxay awood u leedahay inay kordhiso shaqo joojinta haday lagama maarmaan u aragto.
6. Go'aanka shaqada lagaga joojinayo garsooraha waa inaanay saamayn ku yeelan mushaharkiisa.

## XEER ANSHAXEEDKA GARSOORKA

---

### **Anshax ciqaabeedka ka dhanka ah xeer ilaaliye ku xigeenada**

#### **Ujeedooyinka iyo fulinta Anshax Ciqaabeedka**

Ujeedada Guud ee laga leeyahay anshax marintan ka dhanka ah ku-xigeenada Xeer-ilaaliyaha Guud waa in la saxo falalka qaldan si ay cashar ay wax ka bartaan ugu noqoto ku xigeenada xeer ilaaliyaha guud, haday laga maarmaan noqotona shaqada looga eryo kuwa aanay suurto gal ka ahayn inay hagaagaan.

Ku xigeenka xeer ilaaliya guud ee ku guuldaraysta ama ka gaabiya gudashada waajibaadkiisa mihnadeed, ama baal mara xeer anshaxeerka iyo waxyaabaha uu dhigayo waxa laga qaadayaa talaabooyinka iyo ciqaabaha ku dhigan xeer anshaxeedka.

Talaabooyinka anshax marineed ee loo qaaday si waafaqsan xeer anshaxeedka kama hor istaagayaan dacwad madaniya ama mid ciqaabeed in lagu soo oogo Xeer-ilaaliye ku xigeenka.

#### **Noocyada Anshax Ciqaabeedka**

Dacwada xeer ilaaliye ku xigeenka guud ee lagu helo inuu galay fal anshax xumo waxa looga go'aan gaadhayaa si waafaqsan qodobada xeer anshaxeedka.

Talaabooyinka anshax marineed ee laga qaadayo ku-xigeenada Xeer-ilaaliyaha Guud ee lagu helo falalka anshax xumo waxay noqonayaan kuwan hoos xusan:

- Digniin afka ah;
- Digniin qoraal ah;
- Ganaax aan ka badnayn bil mushaharkeed;
- Ganaax laba bilood ilaa sedex bilood oo mushahar ah;
- Hoos u dhigid hal darajo;
- Shaqo ka eryid.

XEER ANSHAXEEDKA GARSOORKA

---

Lacag kasta oo Guddida Cadaaladu ka hesho ganaaxyada falalka aan haboonayn waxa lagu shubayaa khasnada dawlada.

**Noocyada Anshax Marinta Ka Dhanka ah Xeer -ilaalinta**

Noocyada anshax marinta ah ee laga qaadayo ku-xigeenada Xeer-ilaaliyaha Guud waa:

- B. Anshax xumada fudud;
- T. Anshax xumada culus.

**B. Anshax Xumada Fudud ee Ku-Xigeenka Xeer Ilaaliyaha Guud**

Tusaalayaasha hoos ku xusan ayaa ah anshax xumada fudud:

1. Ku-xigeenka Xeer-ilaaliyaha Guud oo ka gaabiya inuu shaqadiisa u guto si xilkasnimo leh isla markaana masuuliyadi ku jirto.
2. Ku-xigeenka Xeer-ilaaliyaha Guud oo caqabad ku noqda dacwad socota, ama ka gaabiya inuu gacan siiyo shaqada hawl-wadeenada kale ee garsoorka ama qareenka dhinacyada dacwada.
3. Ku-xigeenka Xeer-ilaaliyaha Guud oo lacag ka amaahda qof dano gaar ah ama dano dadban ku leh dacwad uu gacanta ku hayo xeer ilaaliye ku xigeenku.
4. Ku-xigeenka Xeer-ilaaliyaha Guud ee soo bandhiga ama la wadaaga xog la xidhiidha dacwad ama xog kasta oo kale oo la dhawray, dad aanu sharcigu u ogolayn inay xogtaas helaan, iyadoo aanu jirin amar uga yimid madaxda ka saraysa.

XEER ANSHAXEEDKA GARSOORKA

---

5. Ku-xigeenka Xeer-ilaaliyaha Guud oo ku kaca fal kasta oo kale oo loo turjuman karo inuu keensanayo anshax xumo fudud.

**T. Anshax Marinta Culus ee Ku-xigeenada Xeer-ilaaliyaha Guud**

**Tusaalayaasha hoos ku xusan ayaa ah anshax xumada culus:**

1. Ku-xigeenka Xeer-ilaaliyaha Guud oo codsada ama qaata laaluush.
2. Ku-xigeenka Xeer-ilaaliyaha Guud oo muujiya eex dhinac dacwad ka mid ah sababo la xidhiidha dano shaqsiyadeed iyo dheef, ama danaha iyo dheefta dad kale.
3. Ku-xigeenka Xeer-ilaaliyaha Guud oo sameeya qoraalo been abuur ah sababo la xidhiidha danaha qofeed iyo dheef, ama danaha iyo dheefaha dad kale.
4. Ku-xigeenka Xeer-ilaaliyaha Guud ee lacag ka amaahda qof xidhiidh la leh dacwad, taasoo wax yeelayn karta awoodiisa ah inuu shaqadiisa u guto si dhex-dhexaadnimo ah.
5. Ku-xigeenka Xeer-ilaaliyaha Guud oo si badheedha ama xil kasnimo la'aan ah u qariya ama ka gaabiya inuu keeno ama soo bandhigo xog dacwadeed, taasoo keeni karta in xukun qaldan ka soo baxo dacwada.
6. Ku-xigeenka Xeer-ilaaliyaha Guud oo iyadoo aanay jirin sabab macquul ah ama la aqbali karo curyaamiya awooda uu ku gudanayo waajibaadkiisa.
7. Ku-xigeenka Xeer-ilaaliyaha Guud oo shaqada ka maqnaada iyado aanay jirin ogolaanshiiyo iyo cudur-daar macquul ah ama la aqbali.

XEER ANSHAXEEDKA GARSOORKA

---

8. Ku-xigeenka Xeer-ilaaliyaha Guud oo u dhaqma qaab ku lid ah sharafta maxkamada inta garmaqalku socdo.
9. Ku-xigeenka Xeer-ilaaliyaha Guud oo si badheedh ah ama xilkasnimo la'aan ah u wax yeeleeya hantida xafiiska.
10. Ku-xigeenka Xeer-ilaaliyaha Guud oo diida inuu raaco tilmaamo af ahaan ama qoraal ahaan uga yimid madaxda ka saraysa si waafaqsan sharciga, isaga oon uhaysan sabab macquula ah ama la aqbali karo diidmadiisa.
